Talooyin laga yaabo inay wadcigaaga badalaan

==========@@@==========@@@==========

W/Q *Salmaan Koosaar*

Ku dadaal alle ka cabsiga iyo raacista sunnada nabiga, ahaw qof ku sifaysan sifooyinka wanaaga sida runta, deeqsinimada, dulqaadka, sabirka, iyo cibaadada. Ha noqon qof calool ku sid leh ilow wixii shaley dhacay, noqo mid sabir badan waayo ilaahey wuxuu la jiraa kuwa sabirka badane, ahaw qof fikira oo aan fadhiid ahayn laakiin fikirkaagu yaanu noqon mid diinta dhaawaca, fikirku wuu wanaagsan yahay laakiin meelaha qaarkood fikir uma baahna, marka aad seexato naftaadu waxay tagtaa xagga kore laakiin kuuma sheegto waxay soo aragtey isku day sidii aad u xaqiijin lahayd inaad gaadho waxa nimco ah ee ay soo aragtey, lacagta waad jeceshahay laakiin ka horeysii cilmiga waayo qofka cilmiga lihi lacag wuu helaa laakiin kan lacagta lihi sida badan iskuma hawlo barashada cilmiga sidoo kale qofka cilmiga lihi waa kan ka muuqda sooyaalka dunida laakiin kan lacagta lihi sida badan kama muuqdo, noqo qof adkaysi badan oo suga fursadiisa, ha dayicin waqtigaaga oo ha ku qaadan kalfadhiyada dahsoon, ka faaiideyso waqtiga isguraya oo raasamaal u sii dhiibo, miyuu qof cilmi leeyahay haddii uu leeyahayna waa intii uu ka dheefay ka faaiideysiga waqtiga, waqtigaad lumisaa noloshaada kama tirsana sidaa darteed yaree inta aad awoodo, noqo mid raaca asxaabta wanaagsan, ha nicin saaxiibkaa haddii aad kala fikir tihiin laakiin soo dhawee, badso dhoolacadeynta waxa laga yaabaa dad badan inay dawo u noqotee, higso qof kaa sareeya oo ha ku gaabsan inta aad gaadhey, hanka qof walba doonayo inuu gaadho waxa jira qof hore u gaadhey, darajo kasta oo bani aadam gaadhey oo aan nebinimo ahayn waad gaadhi kartaa, iska jir inaad dadka quudhsato waayo mid kasta oo cilmi sare gaadhey waxa jira mid ka sareeya, isku day inaad raali galiso ilaahey iyo makhluuqiisa, haddii raali ahaanshaha bani aadamku ka hor yimaado raali ahaanshaha ilaahey horeysii raali ahaanshaha ilaahey waayo waxa mar kasta la hormariyaa ka awooda badan, haddii uu jiro qof saaxiibkaa ah oo cadaawadi idin dhex marto ha ku farxin jabkiisa waayo waxa laga yaabaa maalin inaad rafiiq dhaw noqotaan oo aad ka

qoomamooto, isku day inaad cibaadada joogteyso ha na ugu baaqin qof kale inuu wanaag sameeyo ama xumaan ka tago adoon samayn ama ka tagin.

Ha islahaado waxaad ku hadlayso iyo camalkaagu, dheeho sooyaalkii tagey eeg xaalada maanta intaa ka dib hilaadi mustaqbalka, ha dhisin kaliyaata muruqyada muuqa isku day oo awooda saar sidii aad u dhisi lahayd muruqyada maanka, waayo muruqyada maanka ayaa ka saamayn badan muruqyada muuqa, xusuusnow mar walba inuu jiro mid kaa awood badan oo ku xisaabin doonaa, mar walba niyada ku hay inaad dhiman doonto maalin ka mida maalmaha is cidhbinaya magacaagana laga guuri doono oo MEYT laguu bixin doono, ku dadaal inaad raali galiso waalidka alle kaa unkay iyagaa raaligalinta makhluuqa ugu mudane, ha dhibsanin canaanta waalidka oo miyuu yahay waalidku mid wanaagaaga jecel mooyee mid kale, ka fogow kibirka iyo isla waynida, ku sifaw dhowrsoonaanta iyo isdhuldhiga, ku adkayso fikirkaagu hadii uu toosan yahay xataa haddii dunidu kaa soo horjeedsato , ka noqo fikirka qaldan haddii lagaa mudan yahay.

Ka ag dhawaw kheyrka iyo goobihiisa, ka fogow sharka iyo goobihiisa, haddii fikir laguula yimaado u bandhig diinta haddii ay is af gartaan qaado haddii kala se ka joogso, badi wax akhriska iyo daraasadeynta, ku kab aqoontaada qoraalka, ku dadaal farsamadaada waxa loo badiyaa inaad guul ka gaadhee illeen dadaalaa xaaji cabaas wuu gaadhaa wuuna dhaafaaye, ha igu raacin qabiilkayga hana igu diidin qabiilkeyga laakiin igu raac ama igu diid shakhsiyadeyda, haddii aqoon laguu tiiriyo ku dadaal xifdiga oo miyuu cilmigu qiimo leeyahay xifdi la’aan, akhri waxa cindigaaga mudnaanta leh oo waqtiga ha iskaga lumin wax aanad xiiso u hayn, dhagayso dadka xikmada leh waxa laga yaabaa inaad ka hesho xikmad wadcigaaga nololeed badasho’e, noqo qof hadalkiisu kooban yahay waayo mar kasta oo hadalkaagu bato waxa badan dhacdhacaaga, aamus ilaa haddii aad aragto in inaad hadashaa ka mudan tahay aamuskaaga, caawi dadka baahan iyo fuqarada kuna caawi niyad sami iyo wanaag aad u hayso, ha ka sugin abaal aad gashey dheef badal, haddii cilmiga waafi ah ilaahey ku siiyey ha ku bakhaylin inaad bixiso waayo cilmigu haysashada wuu ku yaraadaa bixintana wuu ku kobcaa.

Ku dadaal salaadaha shanta ah inaad waqtigooda gudato, ku dadaal soonka waayo soonku waa camalada ilaahay ku qaaliga ahe, ku dadaal bixinta sadaqada si aad farxad u hesho, badso hadalka wanaagsan isagaa sadaqo ahe, asxaan u samee dadka da'doodu wayn tahay waxaa laga yaabaa markaad gabowdo in laguu ixsaan falee, adeec waalidkaa oo u dhago nuglaw si ubadkaagu kuugu dhago nuglaadaan, ka fogow boqortooyada shaydaanka, ku biir boqortooyada mudanayaasha ilaahay, yeelo rafiiq wanaagsan waxaad hadhsan carshiga ilaahay'e.

ka fogow beenta iyo wajiyadeeda hana isku dayin inaad inan walaashaa ah ama inan walaalkaa ah been u sheegto si aad uga hesho dheef badal, beentu war war danbe ayey leedahay laakiin runta kulaylkeedu waa inta hore, ku dadaal ilaalinta dadkaaga, dalkaaga iyo danahaaga, haddii danta guud iyo dantaada gaarka ahi is hirdiyaan hormari danaha guud waayo taas ayaa dheef badan mid dheef yar inaad ka horeysiiso mid dheef badani waa astaamaha waalida, ha la coloobin qabiil dhan ama wadan dhan waayo waxaa ka mida dad wanaagsan, ha ku diidin walaashaa qabiilkeeda, ha ku diidin walaalkaa qabiilkiisa, ha ku nicin qofna faqriga iyo baahida waayo waxa laga yaabaa inuu yahay tijaarka barrito, ka fogow dulmiga iyo wajiyadiisa waayo dulmigu waa madaw ka mida madawyada maalinta danbaysa, ha noqon markhaati beenaale lacag lagu shubto si loogu hadlo waayo intaa waad ka qiimo badan tahay, ka fogow xanta iyo xasadka, ha xaasidin qofna waayo xaasidnimadu aday ku dhibaysaa wax ku dhibaya inaad raaxo ka daydaana waa gef, ilaali culimada sunnada ku taagan hana ogolaan in la caayo waayo ninkaa culimada xaqa ku taagan wax ka sheegaa waa isaga oo diinta wax ka sheegay, ha badsan muranka iyo doodaha madhalayska ah laakiin haddii dood cilmiya ay tahay ugu deeq hantidaada cilmiga.

Noqo qof wax soo kordhiya waayo qofkaan dunida wax ku kordhini isagaa dheeraad ah, noloshu waa imtixaanku ugu adag ee la galo dadku isku su'aalo maahan isku jawaabana maahan laakiin wuxuu yahay qofka guuldareystaa kan ku qora su'aalihiisa aanay cidi la wadaagin jawaab qof kale, iska ilaali inaad ka hadasho arrimo aanad cilmi u lahayn waayo waxa la yidhi qofka ka hadla

waxaanu cilmi u lahayn wuxuu la yimaadaa arrimo lala amakaago, ka feejignaw inaad arrimo diinta ah wax ka sheegto adiga oo aan cilmi u lahayn waayo waxa dhici karta inaad arrinta aad xukuntay xukunkeedu diiniyan yahay fal gaalnimo ah, ka fogow fikirada qaldan iyo kuwa aan diinta qabcadda ku lahayn, iska ilaali in lagu siiyo lacag si aad fikir qaldan oo aad ogtahay u faafiso, dhiirigali da' yarta kaa yar iskuna day inaad u saxdo wixii ka gafsan, badi akhrinta quraanka iyo dhagaysigiisa waayo quraanku waa qareenka saaxiibkii maalinta danbaysa.

Iska hubi saxnimada arrimaha deegaankiina laga aaminsan yahay waxa laga yaabaa inaanay diin sal ku lahayne, ogow inay naftu tahay ammaano uu yahay ka ku ammaaneysiiyey deeq badanaha maalin aanad ogoyna lagaa qaadan doono, ha isku halayn dunida iyo dhalaalkeeda, dhaldhalaalka jabbaan dhag haw dhigin, ha noqon nacamle dawladeed ama tijaar waayo ma mudnid inaad shaqadan qabato, waxaad tahay qof igu qaaliya haddaan ku barto laakiin is ka jir anaaniyada, ka fogow faanka qabiil waayo waxaad ka soomaali ahaan dubaalad dheer u leedahay saamayntiisa, haddii la yidhaahdo buug qor adaan kaa qori lahaa waayo waxaad tahay mid mudan in laga qoro buug, haddii la yidhaahdo boqor caleemo saar waan ku caleemo saari lahaa waayo waxaad tahay kay dunidu isaga ku taagan tahay adiga la'aantaana dunidu maba jirteen, haddii la odhan lahaa nebinimada derejo ayaa lagu gaadhaa waxa doqoniimo kugu ahaan lahayd inaad meel ka hooseysa higsato, ku dadaal inaad dayax shan iyo tobnaada ka noqoto dunida si walaalahaaga niyadoodu u samaato.

Ilaali cahdiga iyo ballanka aad gunuday waayo ballan xumadu waa sifaalaha munaafaqa, sheeg runta xataa haddii rukunada saaxiibkaa dumayaan, ha sheegin been iyadoonay jirin wax kalifaa xataa haddii dunida boqor lagaaga dhigayo, ogow nadaafada iyo quruxda waayo astaamaha diinta waxa ka mida nadaafada, ka dhig masaajidka rafiiqaaga dhuleed ee kuugu dhaw waxa laga yaabaa in malaa'igtu kuu ducaynaysee, ogow in baryada ilaahey qaali tahay oo shay loo dhigaa aanu jirin, waxaa la isku dhaafaa sida ilaahey loogu kala dhaw yahay maaha sida dawlada loogu kala dhaw yahay.

Isku day inta awoodaada ah in aad noqoto ciyaartoyda garoonka dunida oo ha noqon taageerayashaa tarabuunka fadhiya, ogow caafimaadku inuu yahay hanti qaali ah, caafimaadka waa koofiyadda boqorka oo kale dadka caafimaadka qabaa ma arkaan laakiin waxa si fiican u arka dadka xanuunsan, iska ilaali inaad adeegsato waxyaabo caafimaadkaaga dhaawac ku keenaya waayo wax kasta oo caafimaadka waxyeelaa diiniyan waa XAARAAM.

Ha noqon qof haddii uu kufo aan kicin laakiin yeel sida dantaadu ku jirto oo ah inaad markaba kacdo oo boodhka iska tunto si aan laguugu qoslin, kala baro xaaraanta iyo xalaasha waayo haddii aanad kala aqoon waxa dhici karta waxyaabo badan oo xaaraam ah inaad xalaal u haysato ama lidka tibaaxdan, ka fogow ku dayashada saancadaalaha waayo adiga ayaa ka qaalisan, shayga qaaliga ah ayaa mudan in la raaco haddii sidan wax iska badalaan waxaa lagu dari doonaa bogagga dhacdooyinka caalamka.

Ka muslim ahaan aynu yeelano wadajirka shinnida, hogaanka jinaca, wax keydsiga qudhaanjada, wax qabadka aboorka waayo aboorku wuxuu dhisaa dudumo aad uga wayn tamartiisa caqli ahaan, aynu ka dheeraano astaamaha raha, jiirka, jiriqaaga iyo Eyga.

Waxaan rajaynayaa inaad wax badan oo ku anfaca ka heshay, ilaahey ha ka abaaliyo waalidkeena, macalimiinteena iyo dawladaheena intaba. ***Habeen/Maalin wanaagsan.***